

Xannaanaynta Chromebook

Ardaydu waxay mas'uul ka yihiin daryeelka guud ee Chromebook ee uu soo saaray maamulka Portland Public Schools. Ardayda leh Chromebooks jabay ama u shaqeyn waaya si munaasab ah, ay ka lumaan, ama laga xaday waa inay dhibka ku soo wargaliyaan macalinkooda ama ay soo diraan email ay kusoo dirayaan support@pps.net durba sida ugu macquulsan si arinka si munaasab ah wax looga qabto.

Chromebooks ay degmadu leedahay waa inaan loo qaadin adeeg kombuyuutar oo dibadda ah si loogu soo sameeyo dayactir noocii uu ahaadaba ama daryeel. Ardaydu waa inay ula tacaamulaan Chromebook sidii agab qiime badan ayna mar walba ku xareeyaan Chromebook-ga meel bedqabta markii aan la isticmaaleyn.



Qaadashada Chromebooks

- Mar walba u safri Chromebook si taxaddar leh si dhaawac uusan u gaarin.
- Ku qabo Chromebook (ayadoo daboolku u xiran yahay) labo gacmood markii aad qaadeyso.
- Waligaa haka qaban Chromebook saashada markii aad kor u qaadeyso ama ha qaadin Chromebook ayadoo saashadu ay furan tahay.

Daryeelka Saashada

- Saashada Chromebook dhaawac ayaa soo gaari kara hadii loo adeegsado waxyaabo culus, hadii la xoqo, hadii loo adeegsado waxyaabaha dareeraha ah ee wax lagu nadiifyo ee wax mila qaarkood, iyo dareereyaal kale.
- Ku nadiif saashada kaliya maro jilicsan oo qalalan oo dunta adag ay ku yar tahay ama maro ka hortagta korontada danabka ah ee walxaha markii laysku xoqo dhalata. Waligaa ha adeegsan wax leh aalkolo, beys ama dareere qamuun, dareereha guryaha lagu nadiifsho ee windex/ama biyo, ama dareere kale oo wax mila oo aad u daran, ama inaad u isticmaasho marada wax lagu nadiifsho/ama istiraashooyin inaad ku nadiifso Chromebook-gaaga.
- Ha kutaagsan ama ha saarin cadaadis dusha sare ee Chromebook markii uu xiran yahay.
- Waxba haku mudin saashada waxaasoo calaamad u yeelaya ama xoqaya sagxadda saashada.

